# Restricted involuntary treatment orders

About your rights

# Amarada daweynta khasabka ah ee la adkeeyey

Wixii la xiriira xuquuqdaada

Somali

## Soo koobid

Markaad tahay qof ku jooga amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey:

- Waxaad helli doontaa qorshe daaweyneed waadna ka qaybgeli doontaa qorshaynta daweyntaada
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho aragti labaad oo ku saabsan daweyntaada kana timid daaweyaha cilmi nafsiga
- Waxaad xaq u leedahay inaad rafcaan u qaadato Guddiga Caafimaadka Dhimirka taas lidi ku ah ahaanshaha bukaanka amarka
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho talo sharci iyo inaad hesho garyaqaan kuu hadla
- Waxaad awoodaa inaad la hadasho saaxiib ama xubin qoys oo ku matasha
- Waxaad ka dacwoon kartaa daaweyntaada.
- Waxaad xaq u leedahay ayadoo la raacayo *Xeerka Xuquuqda iyo Waajibaadka Insaanka.*

Waxaad awoodaa inaad weydiisato xubin daaweynta ka mid ah, saaxiib, xubin qoyska ka ah, qof kuu hadla booqde ka socda bulshada si uu kaaga caawimo inaad samayso waxyaallahaan.

## Tusmada


| | |
|---|---|
| Amarada daweynta khasabka ah ee la adkeeyey | 2 |
| Daweynta Bukaan jiifka | 3 |
| Amarada daweynta bulshada ee la adkeeyey | 4 |
| Rafcaanka iyo Dib-u-eegida: Guddiga Dib-u-eegida Caafimaadka Dhimirka | 5 |
| Cabashooyinka | 8 |
| Xirriirada muhiimka ah | 8 |


## Amarada daweynta khasabka ah ee la adkeeyey

### Wixii la xiriira xuquuqdaada

Buuggaani wuxuu bixiyaa macluumaad ku saabsan amarada daweynta khasabka ah ee la adkeeyey ama amarada daweynta bulshada ee la adkeeyey waxaadna mudan tahay sida waafaqsan *Xeerka Caafimaadka Dhimirka ee 1986*. Xubin ka mid ah kooxda daweynta ayaa kaala hadli doonta wixii ku saabsan macluumaadkaan kana jawaabi doona su'aallahaaga.

Macluumaadka waa in lagu tarjumaa luqad aad fahi karto ama si aad fahmi karto. Buuggan waxaa lagu tarjumay dhowr luqadood. Waxaad weydiin kartaa kooxda daweynta luqada aad door bidayso. Koobiga buuggaan oo luqada kale ku qoran ayaa laga helli karaa online-ka ah www.health.vic.gov.au/mentalhealth.

### Khadka Macluumaadka Telefoonka

Waxaad macluumaad duuban oo ku saabsan Guddiga Caafimaadka Dhimirka ku dhegaysan kartaa dhowr luqadood adigoo wacaya khadka macluumaadka telefoonka.

Telefoonada nambarkooda waxaa lagu qoray buuggaan gadaashiisa.

Khadadku waa furan yihiin 24ka saacadood, todobada maalmood ee asbuuca.


A Victorian Government initiative

State Government Victoria

Koobiga Xeerka Caafimaadka Dhimirka waxaa laga hellaa adeega caafimaadka dhimirka.

Haddii mar uun haddaad qabto su'aallo la xirira macluumaadkaan ama xuquuqdaada, weydii qof kuu sharxa. Waxaad weydiin kartaa xubin ka mid ah kooxda daweynta, saaxiib, xubin qoyska ka mid ah, qofka u hadla bulshada ama qof booqasho ku yimid.

### *Xeerka Xuquuqda iyo Waajibaadka Insaanka*

*Xeerka Xuquuqda iyo Waajibaadka Insaanka ee Victoria 2006* wuxuu doonayaa inuu horumariyo oo ilaaliyo xuquuqda insaanka. Xeerku wuxuu qeexayaa xuquuqda la ilaalieyey wuxuuna u baahan yahay in adeegyada caafimaadka dhimirka ee dadweynaha ay ku dhaqmaan xuquuqdaan.

Xeerku wuxuu kaloo sii caddaynayaa marka iyo sida xuquuqda uu u xadeeyo sharcigu. Tusaale ahaan, Sharciga Caafimaadka Dhimirka waxaa lagugu xiri karaa adeegga caafimaadka dhimirka haddii ay lagama maarmaan u tahay in la ilaaliyo caafimaadkaaga ama amnigaaga ama ammaanka dadka kale. Si kastaba ha ahaatee, wixii xannibaad ah oo la saaro xorriyaddaada iyo wixii faragelin ah ee xuquuqdaada, arimahaaga gaarka ah, sharaftaada iyo ixtiraamkaaga waa in laga dhigaa inta ugu hooseysa ee lagama maarmaanka u ah duruufahaas.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan xeerka ama sida ay u saamayso daaweyntaada, la xiriir mid ka mid ah haya'daha ku qoran dhammaadka buug-yarahan.

## Amarada daweynta khasabka ah ee la adkeeyey

Amarada daweynta khasabka ah ee la adkeeyey waxaa samaysa maxkamad sida waafaqsan xeerka *Xakumida ee 1991 (Sentencing Act 1991)*. Haddii qof maskaxda ka jiran lagu hellay dembi (aan ka ahayn dembi weyn), waxaa laga yaabaa in maxkamaddu qaadato amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey halkii qofka la xiri lahaa. Ka dibna qofka waxaa la geeyaa adeega caafimaadka maanka jiradiisa dhimirka darteed.

Jirada maanka waxaa lagu qeexay xeerka Caafimaadka dhimirka inuu yahay xaallad caafimaad oo ay ka muuqato isku qasnaan aad u weyn oo fekerka, niyada, sida wax loo arko iyo xusuusta.

Maxkamaddu waxay amartay in lagugu hayo amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey si aad u hesho daawada jirada dhimirka. Maxkamaddu waxay bixisay amar ka dib marka dhakhtarku uu ogaaday in **dhamaan** waxyaallaha soo socda oo dhan ee amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey ay ku khuseeyaan:

- Waxaad u muuqataa in dhimir ahaan aad jiran tahay; iyo
- In jiradaada dhimirku u baahan tahay daweyn taas oo la helli karo iyadoo lagugu hayo amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey; iyo
- In jirada dhimirka darteed, in daweynta khasabka ahi lagama maarmaan u tahay caafimaadkaaga ama amniga (ama ha la hortago ka soo daridida xaalka jireed ama maskaxeed ama si kaleba) ama magangelinta xubnaha dadweynaha kale.

Maxkamaddu waxay u qabanaysaa muddo amarada daweynta khasabka ah ee la adkeeyey, taas oo aan ka badnaan karin laba sano.

Marka lagu geeyo adeega caafimaadka dhimirka, dhakhtarka ayaa kuu jiifinayaa bukaan jiif ahaan ama samaynaya amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey. Hadday suurtagal tahay waxaa lagugu daweyn doonaa bulshada dhexdeeda. Haddii isbitaalka laguu dhigo bukaan jiif ahaan, waa inaad joogtaa adeega caafimaadka dhimirka. Akhri qaybta daweynta bukaan jiifka buuggaan wixii macluumaada oo intaas ka badan. Haddii dhakhtarku kugu jiifiyo amarka daweynta bulshada ee la adkeeyey, akhri qaybta *restricted community treatment orders*.

### Daweynta

Dhakhtarka ayaa kuu diyaarin doona qorshe daawayneed oo wax ka qabanaya baahidaada gaar ahaaneed. Waad ka qaybgeli kartaa qorshaynta dhakhtarkuna waa qadarinayaa waxaad jeclaan lahayd iyo waxaad rabto ama dareemayso.
Dhakhtarkaaga wuxuu kaloo tixgeklin doonaa waxay jecel yihiin weliga, xubnaha qoyska ama daryeelaha kowaad kaas oo ku howlan siinta daryeel joogto ah (inaad diido mooyee), wax kasta daaweyno noqon manfac baddeli iyo wax kasta khatro waaweyn ah ee daaweyntaada.

Si kasta ha ahaatee, haddii dhakhtarkaagu aaminsan yahay inay lagama maarmaan tahay dawada dhimirku, dawadaas waa lagu siinayaa xataa haddaad diido. Haddii taasi dhacdo, dhakhtarkaaga ayaa kuu sharxi doona sababta daawadu muhiimka kuugu tahay. Dhakhtarkaaga ama xubin ka mid ah kooxda ayaa kaala hadli doona qorshaha daweynta waxayna ku siin doonaa koobi.

Dhakhtarkaaga iyo xubnaha kale oo kooxda daweynta ayaa joogto kaagala hadli doona wixii lagaa hellay,

dawada, sida laguu dawaynayo, habkii kale oo laguu dawayn karo iyo adeegyada la helli karo. Si joogta ah waxay dib-u-eegi doonaan una cusboonaysiin doonaan qorshahaaga dawaynta. Waxaad helli kartaa saaxiib ama qof kuu doodaya markaad kala hadlayso dhakhtarka dawaynta.

Xubnaha qoyska, daryeel bixiyayaal kale ayaa bixin kara kaalmo wax ku oolla iyo daryeel markaad daawo u qaadanayso jirada. Guud ahaan, waxaa la siin doonaa keliya macluumaad ku saabsan dawayntaada haddaad ogolaato. Si kasta ha ahaatee, haddii masuulka, xubinta qoyska ama daryeellaha asaasiga ahi u baahan yihiin macluumaad si ay kuu daryeellaan, xubin ka mid ah kooxda ku dawaynaysa ayaa siin kara macluumaad, xataa haddaadan ogolaan.

## Aragti labaad

Xaq ayaad u leedahay inaad hesho aragti labaad oo dakhtar oo ku saabsan xaallada iyo daawayntaada. Qofka kuu ah maamulaha kayska ayaa kaaga qaban qaabin kara adeega caafimaadka dhimirka dhexdiisa ama iyaga ayaa kaa caawimi kara inaad doorato dhakhtar. Haddaad doorato dhakhtar gaara waxaa laga yaabaa inaad lacag bixiso. Waxaad kala hadli kartaa aragtida labaad dhakhtarka ku dawaynaya; si kasta ha ahaatee, dhakhtarka ku dawaynaya ayaa masuul ka ah dawada aad qaadanayso go'aankeeda ugu dambeeya.

## Hellitaanka macluumaadka

Sida waafaqsan Xoriyada Macluumaad Hellida (Freedom of Information) xaq ayaad u leedahay inaad dalbato dukumintiyo ku saabsan macluumaadka qof ahaaned oo uu hayo adeega caafimaadka dhimirku. Haddii aad doonayso inaad hesho maclumaadka, waxaad weydiisan kartaa xubin ka mid ah kooxda dawaynta ama adeega caafimaadka dhimirka ama qofka u qaabilsan xoriyada hellida macluumaadka si uu kaaga caawimo samaynta dalabka.

Ururada laga yaabo inay kaa caawimaan dalabka hellida macluumaadka waxay ku qoran yihiin dhamaadka buugan.

# Daweynta Bukaan jiifka

Qaybta buuggaan ka midka ah waxay wadataa macluumaad ku saabsan xuquuqdaada iyo waxaaad xaq u leedahay marka lagu dhigo isbitaalka oo lagugu jiifiyo amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey.

## Fasaxa maqnaanshaha

Waxaa laga yaabaa in laguu ogolaado inaad ka baxdo adeega caafimaadka dhimirka muddo gaaban (tusaale, saacado yar, habeen dhax ama Sabtida iyo Axada) si aad u booqato qoyska ama saaxiibadaa ama dana kale u baxdo. Haddii aad jeclaan lahayd inaad fasax hesho, waxaa waajiba inaad la hadasho xubin ka mid ah kooxda daweynta. Dhakhtarkaaga ayaa go'aanka ugu dambeeya samayn doona.

## Meel gaara ku haynta iyo xakamaynta

### Meel gaara ku haynta

Midaani waa marka qofka lagu hayo qol gaara kaas oo albaabada iyo daaqadahaba laga xiray dibada. Tani waxay dhacdaa keliya hadday muhiim tahay in laga xafido qofka ama kuwa kale khatar u badan inay ku dhacdo caafimaadkiisa ama amaankiisa ama in laga ilaaliyo fakashada. Waxaa la isticmaalaa keliya mar xal kasta oo kale shaqayn waayey.

### Xakamayn farsamo

Xakamayntu waa isticmaalida aallad sida xakame ama suun si loo xadado qofka xoriyadiisa dhaqdhaqaaqa. Xakamaynta waxaa laga yaabaa in loo adeegsado si qofka loogu suurtageliyo in la daweeyo, in laga hortago in dadku dhaawacaan ama dhib u geystaan dadka kale ama qofku sii wado burburinta hantida.

### Ansixinta iyo la socodka meel gaara ku haynta iyo xakamaynta

Meel ku haynta iyo xakamaynta waxaa ansixin kara dhakhtar, xaallad degdeg ah, iyo kalkaaliye caafimaad oo idman. Waxaa la isticmaali karaa keliya marka sababaha kor ku xusani khuseeyaan.

Haddii qol gaara lagugu hayo ama lagu xakameeyo, shaqaaluhu waa inay ku siiyaan waxaad ku seexan lahayd, dhar, cunto cabitaan markaad doonto. Sidoo kale waxaa waajiba inay kuu ogolaadaan musqul iyo fursada aad ku qubaysato.

Kalkaaliye caafimaad waa inuu eegaa xaalladaada jir iyo caafimaad ugu yaraan 15kii daqiiqaba hal mar. Sidoo kale waa in dhakhtar ku eegaa afartii saacba hal mar, haddii aanu ku talin dhakhtarkaagu in eegida caafimaad oo kala fogi ku haboon tahay xaalladaada. Haddii lagu xakameeyo waa in si joogta ah laguula socdaa.

### Warqadaha iyo telefoon ka wicida

Waxaad kula xiiriiri kartaa dadka warqado ama telefoon. Warqadaada la furi maayo.

### Xawilid

Waxaa laga yaabaa in laguu bedelo xarun kale oo adeega caafimaadka dhimirka haddii dhakhtarku aaminsan yahay inaad ka faaiidaysanayso bedelaada ama hadday lagama maarmaan u tahay dawayntaada. Haddii aadan doonayn in lagu bedelo, waa inaad la hadashaa dhakhtarkaaga ama waxaad rafcaan u qaadan kartaa Guddiga Dib-u-eegida Caafimaadka Dhimirka. Haddii lagu bedelo rafcaanka ka hor, Guddiga ayaa go'aanka gaari doona in laguu celiyo adeegii asalka ahaa marka rafcaanka la qaado ka dib.

### Amarada daweynta bulshada la adkeeyey

Haddii dhakhtarkaagu ama madaxa dhakhaatiirtu aaminsan yihiin inaad ku dhex noolaan karto bulshada dhexdeeda adoo qaadanaya dawada aad u baahan tahay, waxaa laga yaabaa in lagugu hayo amarka daweynta bulshada ee la adkeeyey weydiina xubin ka ah kooxda daweynta si ay kuugu sharxaan.

### Ka qaadida amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey

Haddii madaxa dhakhaatiirtu ku qanacsan yahay in shuruud kasta oo ka mid ah amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey, waxaa waajiba in lagaa qaado amarka waxaadna xor u tahay inaad baxdo. Si kasta ha ahaatee, haddii adiga iyo dhakhtarkaagu u malaynaysaan inaad ka faaiidaysanayso daaweyn kale adeega caafimaadka dhimirka, waxaad weydiisan kartaa inaad ku joogto hab aan ku salaysnayn khasab.

Haddii mar uun aad doonayso inaad ka baxdo amarka daweynta khasabk ah, waxaa waajiba inaad la hadasho dhakhtarkaaga ama xubin ka mid ah kooxda daweynta, ama waxaad rafcaan u qaadan kartaa Guddiga Dib-u-eegida Caafimaadka Dhimirka. Haddaad rafcaan qaadato iyo haddii kaleba, Guddigu waxay dib u eegi doonaan arrintaada 8 asbuuc gudaheed marka lagu geeyo amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey dabadeedna ugu yaraan 12kii biloodba hal mar inta amarku socdo. Dhakhtarkaagu ayaa joogto kuu arki kara haddii lagaa saaro.

## Amarada daweynta bulshada ee la adkeeyey

Qaybtan buugggu waxay ka kooban tahay xuquuqdaada iyo waxaad xaqa u leedahay haddii lagugu hayo amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey. Amarada daweynta bulshada ee la adkeeyey (RCTO) waa amaro waafaqsan Xeerka Caafimaadka Dhimirka taas oo u suurtagelinaysa dadka amarada daweynta khasabka ee la adkeeyey inay ku noolaadaan bulshada dhexdeeda marka ay hellaan daweynta jirada dhimirka.

Haddii dhakhtarka iyo madaxa dhakhaatiirtu aaminsan yihiin inaad helli karto daweynta aad u baahan tahay adigoo ku dhex nool bulshada dhexdeeda, waxaa lagugu hayn doonaa amarada ku daweynta bulshada dhexdeeda ee la adkeeyey. Weli waxaad ku jiraysaa amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey, xataa haddii aad ku nooshahay bulshada dhexdeeda adigoo ku jira amarada daweynta bulshada ee la adkeeyey.

### Qorshaynta amarada daweynta bulshada ee la adkeeyey

Dhakhtarka ama madaxa dhakhaatiirta ayaa kaala hadli doona amarada daweynta bulshada ee la adkeeyey iyo sababteeda. Waxaad qayb ka noqon kartaa qorshaynta amarka waxaad jeceshahayna waa la qadarin doonaa. Tusaale ahaan, waxaad yeellan kartaa dhakhtar gaara oo doonaya inuu kormeero amarka. Dhakhtarka iyo madaxa dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi doona marka amarka la sameeyey. Haddii dhakhtarkaagu sameeyo amarka, waa inuu u sheegaa dhakhtarka madaxda ah.

### Qorshaha daweynta

Dhakhtarka ayaa diyaarin doona qorshaha daweynta ee cusub. Qorshaha daweyntu waxaa ku jiri doona qiimaynta baahidaada wixii ku saabsan baahidaada sii wadida dawaynta iyo caawimada bulshada iyo sida ugu fiican oo sidaas loo qaban karo.

Waxaad ka qaybgeli doontaa qorshaynta daweynta dhakhtarkaaguna wuu qadarin doonaa waxaad jeceshahay iyo waxay ka welwelsan tahay. Dhakhtarkaaga ama xubin kale oo ka mid ah kuwa kooxda daweynta ayaa ka qaybgeli doona daweyntaada wuxuuna ku siin doonaa koobiga. Qorshaha waxaa ku jiri doona:

- Qeexida daweyntaada
- Magaca dhakhtarka la socon doona daweyntaada

- Magaca dhakhtarka kormeeri doona daweyntaada
- Magaca maamulida kayskaaga
- Meesha iyo waqtiga aad hellayso daweynta
- Immisa jeer ayaa dhakhtarka kormeeraya u diyaarinayaa dhakhtarka la soconaya
- Wax kale oo kasta oo dhakhtarkaagu u malaynayaa waa sax.

### Shuruudaha amarka daweynta bulshada ee la adkeeyey

Waxaa lagu siin doonaa koobiga amarada daweynta bulshada ee la adkeeyey. Amarku waa soconayaa ilaa laga noqdo ama lagaa saaro, ama ilaa amarkaaga daweynta khasabka ah ee la adkeeyey laga saaro meesha ama uu dhaco. Amarka daweynta bulshada ee la adkeeyey (RCTO) wuxuu mararka qaarkood sheegayaa meeshaad ku nooshahay. Amarku wuxuu kaloo sheegi karaa shuruudo kasta oo dhakhtarkaagu ama dhakhtarka sarre u arko inay muhiim tahay. Dhakhtarkaagu ama dhakhtarka sarre way ku kala duwanaan karaan waqtiyada qaarkood, waana inay sababta kaala hadlaan.

Haddii aadan ku faraxsanayn shurudaha, waa inaad la hadashaa xubin ka mid ah kooxda daweynta ama waxaad rafcaan u qaadan kartaa Guddiga Dib-u-eegida Caafimaadka Dhimirka.

### Ka noqoshada amarka daweynta bulshada ee la adkeeyey

Haddii aadan u hogaasamin RCTO ama qorshahaaga daweynta, xubnaha daweynta ayaa isku deyi doona inay ku caawimaan inaad u hogaansanto. Si kasta ha ahaatee, haddii aadan weli raacin waxaa jirta khatar aad u weyn in xaallada caafimaad ka sii dari doonto raadcid la'aanta awgeed. Dhakhtarkaaga ama dhakhtarka sarre ayaa burin kara RCTO-da waana in lagugu celiyaa adeega caafimaadka dhimirka.

RCTO-kaaga ayaa laga yaabaa in la buriyo haddii dhakhtarkaaga ama dhakhtarka madaxda ahi aaminsan yahay in jiradaadu kaga soo raynayso adeega caafimaadka dhimirka.

Marka RCTO-kaaga la buriyo, da'daal macquulla ayaa la samayn doonaa si laguguu sheego waxaana waajib kugu ah inaad tagto adeega caafimaadka dhimirka.

### Qaadida amarka daweynta bulshada ee la adkeeyey

Haddii dhakhtarka weyni aaminsan yahay mid walba oo ka mid ah shuruudaha amarka daweynta khasabka ah in aanay ku khusayn mar dambe, waa in lagaa saaraa amarka daweynta ee la adkeeyey. Waxaad kala hadli kartaa daweyn sii socota taas oo ku salaysan rabitaan aan khasab ahayn maamulaha kayskaaga ama dhakhtarka.

Haddii mar lagaa saaro RCTO-da, waxaa waajiba inaad la hadasho dhakhtarkaaga ama xubna kale oo ah kuwa dawaynta, ama waxaad rafcaan u qoran kartaa Guddiga Dib-u-eegida Caafimaadka Dhimirka. Haddaad qaadato rafcaan iyo haddii kaleba, Gudigu waxay ugu horayn dib u eegi doonaan xaalkaaga muddo 8 asbuuc ah gudaheed marka lagugu keenay amarka daweynta intaas ka dibna 12kii bilood oo walba hal mar haddii aad amarkaan ku sii jirto. Guddiga ayaa iyaguna si joogta ah dib ugu eegi doona in lagu sii daayo iyo in kale.

## Rafcaanka iyo Dib-u-eegida: Guddiga Dib-u-eegida Caafimaadka Maanka

Qaybtan buugga waxaa ku yaal macluumaad ku saabsan xuquuqdaada iyo waxaad xaq u leedahay si aad rafcaan u qaadato si ay guddiga dib-u-eegida caafimaadka dhimirku dib ugu eegaan.

### Khadka macluumaadka telefoonka

Waxaad dhegaysan kartaa macluumaad duuban oo kooban lana xiriira guddiga dib-u-eegida caafimaadka maanka, macluumaadkaas oo luqada badan ku duuban adigoo wacaya khadka macluumaadka telefoonka oo ku qoran buugga dhamaadkiisa. Khadadku waa furan yihiin 24ka saacadood, 7 berri asbuucii.

### Hawlaha Guddiga

Guddiga Dib-u-eegida Caafimaadka dhimirku waa traybuunal madaxbanaan kuwaas oo:

- Dhegaysta rafcaanada bukaanka kujira amarada daweynta khasabka ah kuwaas oo doonaya in amarka lagaa qaado;
- Dib-u-eegida dhamaan bukaanka amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey 8 asbuuc gudhiis si go'aan looga gaaro in la sii hayn karo iyo in kale;

- Dib-u-eegida dhamaan bukaanada amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey 12kii biloodba mar si go'aan looga gaaro haddii laga saarayo iyo haddii kale;
- Dib u eega bukaanada ku jooga amarka daweynta bulshada la adkeeyey 12ka bilood
- Waxay dhegaystaan rafcaanada bukaanada aan doonayn in loo xawilo adeega caafimaadka dhimirka

Rafcaan ama dib-u-eegid kastaa waxay dib u dersi doontaa qorshayntaada daweynta.

## Xuquudaada rafcaan u qaadashada Guddiga

Xaq ayaad u leedahay inaad rafcaan u qaadato guddiga dib-u-eegida Caafimaadka Dhimirka mar kasta oo aad doonto. Haddii aad rabto inaad rafcaan qaadato, weydii xubin ka mid ah kooxda dawaynta si aad u hesho foomka rafcaanka, buuxi weydiisana xubin kooxda ka mid ah inuu u diro guddiga. Haddii aanu oolayn foomka rafcaanku, waxaad warqad ama email u diri kartaa guddiga adoo sheegaya magacaaga, adeega caafimaadka dhimirka iyo inaad doonayso inaad rafcaan ka qaadato. Guddigu waa inay dhegaystaan rafcaankaaga sida ugu dhaqsaha badan. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawimo buuxinta foomka ama wax kaleba lagaa caawimo, waa inaad weydiisaa xubin ka mid ah kooxda dawaynta, saaxiib, qof qoyska ka mid ah, garyaqaan ama qof bulshada ka mid ah oo ku soo booqday.

## Meelaha lagala xiriirayo Guddiga

Si loogu diro fakis, warqad ama email guddiga ama aad u hesho macluumaad siyaada ah, isticmaal faahfaahinta hoos ku taal:

Executive Officer (Sarkaalka Fulinta)
Mental Health Review Board
Level 30, Marland House
570 Bourke Street, Melbourne, Victoria 3000

| | |
|---|---|
| Taleefan: | 8601 5270 |
| Lacag la'aan: | 1800 242 703 |
| Fax: | 8601 5299 |
| Email: | mhrb@mhrb.vic.gov.au |
| Web site: | www.mhrb.vic.gov.au |

## U diyaarinta Dhegaysiga Guddiga

Guddiga ayaa kuu soo diri doona ogeysiin ay kuugu sheegayaan taariikhda, meesha iyo waqtiga dib-u-eegida ama rafcaankaaga la dhegaysanayo. Waxaa iyana loo sheegi doonaa maamulaha kayskaaga iyo dhakhtarka dhegaysiga. Xaq ayaad u leedahay inaad timaado dhegaysiga haddii aan guddigu go'aan ka gaarin in midaani caafimaadkaaga u xun tahay. Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad timaado oo sheegato mawqifkaaga. Waxaad keeni kartaa qof adiga ku kaalmaynaya ama kuu hadla; matalan, u doode, garyaqaan, dhakhtar gaara, saaxiib ama qof ka tirsan qoyska. Haddii aadan awoodin inaad timaado dhegaysiga, waa inaad sida ugu dhaqsaha badan ugu sheegtaa guddiga.

Inta aadan imaan dhegaysiga, akhri dukuminitiga lagu siin doono intaan guddigu ku dhegaysan (hoos fiiri) kana feker waxaad oranayso guddiga. Waxaa kaloo laga yaabaa inaad siiso guddiga qoraal qoran. Qoyskaaga iyo saaxiibadaa ama qof aad ixtiraamto ayaa laga yaabaa inuu rabo inuu warqad qoro ama yimaado dhegaysiga si uu u caawimo rafcaankaaga ama dib-u-eegida.

Haddii aad qabto baahi gaara, sida mutarjum, waa inaad kala hadashaa xubin ka mid ah kooxda daweynta ama la xiriir guddiga. Guddiga ayaa kuu raadin doona mutarjum haddii loo baahdo.

Ururada laga yaabo inay caawimaan rafcaankaaga ama dib u eegaan ayaa lagu qoray dhamaadka buugan yar.

## Hellida dukumintiga dhegaysiga

Adiga ama qofka wakiilka kaa ah ayaa la siin doonaa fursada ay ku akhriyaan dukumintiga si loo siiyo guddiga dhegaysiga, kuwaas oo ay ku jiraan faylka baarida iyo warbixinta dhakhtarkaaga oo ku socota guddiga, ugu yaraan 24saacadood ka hor maalinta dhegaysiga. Si kasta ha ahaatee, dhakhtarkaaga ayaa ka dalban kara guddiga inay kaa joojiyaan inaad aragto dukumintiga ama qayb ka mid ah dukuminitiga haddii la aaminsanayn in:

- Aragtida dukumintigu dhibaato u keenayso caafimaadkaaga ama amniga qof kale ama
- Macluumaadka dukumintiga si waa la bixiyey si kalsooni ah amase waa macluumaad shakhsiyeed oo ku saabsan qof kale.

Haddii la qadimo dalab lagaaga joojinayo inaad aragto wax dukuminti ah ama qayb ka mid ah dukuminti, xubin ka mid ah kooxda ayaa kuu sheegi doonta kuuna sharxi doonta sida wax u socdaan. Guddiga ayaa go'aan ka gaari doona inaad wada aragto faylka ama qayb aragto ama aadan waxba ka arag.

Haddii guddigu go'aan ku gaaro inaad aragto dhamaan ama qaar amaba waxbaba waxaa laga yaabaa in qofka ku matalaya loo ogolaado inuu arko.

## Dhegaysiga guddiga

Dhegaysiga guddiga waxaa lagu qabtaa isbitaalka ama adeega caafimaadka bulshada. Dhegaysigaaga waxaa badanaa maqli kara saddex xubnood oo ka mid ah guddiga: garyaqaan, dhakhtar iyo qof ka socda bulshada. Haddii dhegaysiga dib-u-eegida sanadlaha ah ee ahaanta bukaanka amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey, waxaa laga yabaa inuu qabto dhegaysiga hal qof: garyaqaan, dhakhtar ama xubin ka mid ah bulshada oo Guddiga ka tirsan.

Dhegaysigu wuxuu ahaanayaa mid aan rasmi ahayn, haddii guddigu aanay u arkin inay dantaada ama danta dadweynaha tahay in loo furo dadweynaha. Dhaktarkaaga iyo xubin ka mid ah kooxda dawaynta ayaa siin doona warbixinta guddiga. Adiga iyo qofka ku matalayaa waxaad weydiin kartaan su'aallo waxaadna sharxi kartaan sida aad u aragtaan kayska; sababta aad u aaminsan tahay in aadan ahaanayn bukaanka amarka daweynta bulshada ee la adkeeyey.

Guddigu asaasi ahaan ayey u qadarin doonaan xaallada maskaxda ama dhimirka wuxuu kaloo qadarin doonaa taariikhdaada caafimaad iyo xaalladaada mujtamac marka go'aanka la samaynayo.

Haddii aad tahay bukaan-jiif aadana iman karin dhegaysiga jirro darteed, guddiga ayaa laga yaabaa inay kugu booqdaan halkaad ku jirto.

## Go'aanka Guddiga ee rafcaanka ama dib-u-eegida xaallada bukaanka amarka daweynta bulshada ee la adkeeyey.

Guddigu waa inay go'aanka gaaraan haddii dhamaan qodobada khasab ku dawayntu ay weli ku khuseeyaan.

### Ka qaadida xaallada bukaanka khasabka ah

Mid kasta oo ka mid ah qodobada amarka la adkeeyey aanay khusayn, waa lagaa qaadayaa amarka. Haddii aad ku jirtay amarka daweynta bulshada ee la adkeeyey, sidaas oo kale amarka waa lagaa qaadayaa.

Waad kala hadli kartaa sii wadida daweynta si aan khasab ahayn maaulaha kayskaaga ama dhakhtarkaaga. Haddii aad ahayd bukaan jiif, waxaad xor u ahaan doontaa inaad ka tagto adeega caafimaadka dhimirka; si kasta ha ahaatee, haddii adiga iyo dhakhtarkaagu u malaynayaan inaad ka faaiidaysanayso daawa laga qaadanayo adeega caafimaadka dhimirka, waxaad weydiisan kartaa inaad ku joogto ikhtiyaar ahaan.

### Sii wadida xaallaada khasab ah

Haddii Guddigu go'aansadaan in dhamaan qodobada aad ku noqonayso mid ku jooga amarka daweynta khasabka ah ee la adkeeyey inay weli ku khuseeyaan, waad sii wadaysaa qaadashada daawada bukaan aan raaligiisa ku joogin ahaan.

Haddii aad tahay bukaan jiif Guddiguna ku arkaan in daawda aad u baahan tahay in lagu helli karo habkaan amarka daweynta bulshada ee la adkeeyey, waxaa laga yaabaa in lagu amro inuu ku geliyo amarka daweynta bulshada ee la adkeeyey.

Haddii aad ku joogto amarka daweynta bulshada ee la adkeeyey, Guddigu wax waa ka bedeli karaan shuruudaha daweynta. Haddii guddigu buriyo amarka daweynta bulshada ee la adkeeyey, waa inaad ku noqotaa adeega caafimaadka dhimirka.

Guddiga ayaa dib u eegi doona daweyntaada si ay u go'aansadaan haddii qof walbaa raacay habka qorshaha loo samaynayo, tusaale ahaan, wax ma laga qabtay waxaad rabto dhakhtarkuse ma eegay hab kale oo wax lagu daweyn karo? Guddigu waa inuu ku qanacaa in adeega caafimaadka dhimirku uu hirgelin karo qorshaha.

Dhamaadka dhegaysiga, Guddigu waxay kuu sheegi doonaan go'aankiisa iyo sababta ay u sameeyeen. Waxaa lagu siin doonaa koobiga go'aanka. Haddii aad rabto sababta go'aanka loo sameeyey oo qoran, waa inaad kaga codsataa Guddiga 28 berri gudahood, Guddiguna waa inuu ku siiyaa qoraal sababta sheegaya 14 berri gudahood. Mar kale ayaad rafcaan u qaadan kartaa Guddiga markaad doonto.

## Dib-u-eegida Go'aanka Guddiga

Haddii aadan ku raacin go'aanka guddigu gaareen, waxaad rafcaan u qaadan kartaa Taraybuunalka Maamulka iyo arrimaha Madaniga ah ee Fiktooriya (VCAT) si dib loogu eego go'aanka Guddiga. VCAT waa taraybuunal madaxbanaan oo leh awooda lagu ta'kiidiyo ama lagu buriyo go'aanka Guddiga. Dalabyada waxaa lagu sameeyaa qoraal ahaan 28 berri gudahood marka go'aanka Guddigu gaaro ama, haddii aad codsato qoraal sheegaya sababta Guddigu u gaaray, 28 berri gudahood marka la hello qoraalka, waana in loo diraa:

Victorian Civil and Administrative Tribunal
General List
55 King Street, Melbourne, Victoria, 3000

Taleefan: 9628 9755

Fax: 9628 9788

Ururada laga yaabo inay kaa caawimaan dalabyada waxaa lagu qoray dhamaadka buugan yar.

## Cabashooyinka

Waa in si sharaf leh laguu ixtiraamaa lagaana ilaaliyaa wixii dhib ah markaad ka qaadanayso dawayn iyo daryeelid adeega caafimaadka maanka. Haddii aadan ku faraxsanayn qayb ka mid ah dawayntaada ama daryeelka, waad dacwoon kartaa. Meesha ugu fiican oo laga bilaabi karaana waa maamulaha kayskaaga, kalkaalisada caafimaadka asaasiga ah, la taliyaha macmiilaha, ama masuulka bukaanka isbitaalka, ama agaasimaha qaybta adeega caafimaadka dhimirka.

Waxaad kaloo u dacwoon kartaa Xubinta Adeegyada Caafimaadka telefoon 8601 5200 ama madaxa dhakhtarada tel 1300 767 299.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawimo dacwadaada, waxaad weydiin kartaa qof aad aamintay inuu ku caawimo. Kaasina wuxuu noqon karaa qof ka mid ah kooxda dawaynta, saaxiib, qoyska qof ka mid ah, garyaqaan ama qof ku soo booqday oo ka socda bulshada.

## Xiriirada muhiimka ah

Ururada aad la xirriiri karto wixii caawimaad ah iyo macluumaad dheeraad ah waxay ku qoran yihiin hoos:

- **Guddiga Dib u eegista Caafimaadka *(Mental Health Review Board)*** Dhimirka waa maxkamad yar oo madax bannaan oo dhageysata racfaanada bukaanka aan ikhtiyaarka lahayn, bukaanka ku jira amarka daaweynta aan ikhtiyaariga ahayn ee xaddidan iyo bukaanka ammaanka doonaya in laga saaro xaalada daaweynta aan ikhtiyaarka lahayn. Waxay sidoo kale dib ugu eegtaa bukaanadaan si toos ah.

  Level 30, Marland House,
  570 Bourke Street, Melbourne 3000
  Taleefan: 8601 5270
  Lacag la'aan: 1800 242 703
  Fax: 8601 5299
  Email: mhrb@mhrb.vic.gov.au
  Website: www.mhrb.vic.gov.au

- **Soo booqdayaasha bulshadu *(Community visitors)*** waa dad soo booqda adeegyada caafimaadka dhimirka ugu yaraan hal mar si ay wax uga weydiiyaan ku filnaanshaha adeegyada iyo tasiilaadka daaweynta daryeelka bukaanka, baaritaanka cabashooyinka iyo ka warbixinta weydiimahooda iyo baaritaanada.

  5th Floor, 436 Lonsdale Street, Melbourne 3000
  Taleefan: 9603 9500
  Lacag la'aan: 1300 309 337

- **Xarunta Sharciga Caafimaadka Dhimirka *(Mental Health Legal Centre)*** ewa adeeg sharci oo madax bannaan oo ku takhasusay arimaha sharciga caafimaadka dhimirka. Waxaa laga yaabaa inay awoodaan inay kuu soo diraan qof ku metela dhegeysiga Guddiga Dib u eegida Caafimaadka Dhimirka ama ay tallo kaa siiyaan arimaha kale caafimaad.

  9th Floor, 10–16 Queen Street, Melbourne 3000
  Taleefan: 9629 4422
  Lacag la'aan: 1800 555 887

- **Caawimaada Sharciga ee Victoria *(Victoria Legal Aid)*** waxay bixisaa tallo sharci oo bilaash ah oo ku saabsan arimo badan oo kala duwan. Waxaa sidoo kale laga yaabaa inay ku siiso caawimaad sharci haddii aadan awoodin sharci yaqaan gaar ah waxaana laga yaabaa inay kaa caawiyaan metelaada sharciga ah ee dhegaysiga Guddiga Dib u eegista Caafimaadka Dhimirka.

  350 Queen Street, Melbourne 3000
  Taleefan: 9269 0234
  Lacag la'aan: 1800 677 402

- **U doodaha dadweynaha *(Public Advocate)*** wuxuu caawiyaa, la taliyaa oo uu u doodaa dadka qaba cabashooyinka darran ee ku saabsan caafimaadka dhimirka iyo adeegyada iinta iyo daaweynta.

  5th Floor, 436 Lonsdale Street, Melbourne 3000
  Taleefan: 9603 9500
  Lacag la'aan: 1300 309 337

- **Guddiga Xuquuqda Bani'aadamka iyo Fursadaha Siman nee Victoria *(Victorian Equal Opportunity and Human Rights Commission)*** wuxuu caawiyaa dadka si ay u xaliyaan cabashooyinka ku saabsan takoorida, leh hawlo khaas ah oo la xirriira *Xeerka Xuquuqda iyo Masuuliyaadka Bani'aadamka* waxay bixin karaa tallo ku saabsan xeerka.
  Adeegyada waxaa ka mid ah khadka weydiimaha iyo adeega xalinta cabashooyinka ee aan dhinacna raacsaneyn oo bilaasha ah.

  Level 3, 380 Lonsdale Street, Melbourne 3000
  Taleefan: 9281 7100
  Lacag la'aan: 1800 13 41 42
  Website: www.humanrightscommission.vic.gov.au

- **Dhakhtarka Dhimirka ee ugu sareeya** ***(Chief Psychiatrist)*** waa sarkaal sare oo lagu magacaabay Wasaaradda Adeegyada Bani'aadamka Sharciga Caafimaadka Dhimirka, oo leh masuuliyaad khaas ah oo la xirriira dadka qaata adeegyada caafimaadka dhimirka. Kuwan waxaa ka mid ah awooda uu ku baaro cabashooyinka iyo arimaha kale iyo inuu qaado tallaabada lagama maarmaanka ah.

  50 Lonsdale Street, Melbourne 3000
  Taleefan: 9096 7571
  Lacag la'aan: 1300 767 299

- **Guddoomiyaha Adeegyada Caafimaadka** ***(Health Services Commissioner)*** waa guddoomiye madax bannaan oo baadha caawiyana inuu xaliyo cabashooyinka isticmaalayaasha daryeelka caafimaadka. Guddoomiyaha wuxuu ka caawin karaa bukaanka inay isticmaalaan macluumaadka caafimaadkooda.

  30th Floor, 570 Bourke Street, Melbourne 3000
  Taleefan: 8601 5200
  Lacag la'aan: 1800 136 066

- ***Ombudsman*** iku wuxuu baadhaa cabashooyinka ku saabsan wasaaraddaha dawlada.

  3rd Floor, 459 Collins Street, Melbourne 3000
  Taleefan: 9613 6222
  Lacag la'aan: 1800 806 314

Waxaad kaloo weydiin kartaa maamulaha kayska ama xubin kasta oo kale oo ka tirsan kooxda daaweynta wixii ku saabsan ururada kale iyo kooxaha kale ee kaalmada si ay kuu caawimaan.

## Buuggag yar yar oo daabacan ‘Waxyaalaha ku saabsan xuquuqdaada’ taxane ah:

- Bukaanada aan daaweynta ikhtiyaarka u lahayn *(Involuntary patients)*
- Amarada daweynta khasabka ah ee la adkeeyey *(Restricted involuntary treatment orders)*
- Bukaanada amaanka *(Security patients)*
- Bukaanka forensicada *(Forensic patients)*
- Ku daaweynta korontada *(Electroconvulsive therapy)*
- Daaweynta weyn ee aan dhimirka ahayn *(Major non-psychiatric treatment)*
- Amarada ilaalinta ee aan ahayn xagga xannaanada *(Non-custodial supervision orders)*

## Buuggag yar yar oo daabacan ‘Waxyaalaha ku saabsan xuquuqdaada’ taxane ah:

- Bukaanka faraha (heynta iyo amarka xaalada ku meelgaarka ah) ee bukaanka *(Forensic (remand and interim disposition order) patients)*
- Siiwadida daawada (qaybta 12A – 12D) ee bukaanka aan ikhtiyaarka lahayn *(Continuing treatment (section 12A-12D) involuntary patients)*
- Qiimeynta amarada iyo wiisitada, qiimeynta iyo amarada daaweynta *(Assessment orders and diagnosis, assessment and treatment orders)*
- Qaliinka dhimirka *(Psychosurgery)*

Kuwan iyo buuggag yar yar oo kale ayaa laga helayaa interneetka ah www.health.vic.gov.au/mentalhealth oo daabacaad weyn ah.

Buuggagg la soo xulay ayaa sidoo kale lagu helayaa afafka kale.

## Khadka Macluumaadka Telefoonka

Waxaad dhegaysan kartaa macluumaadka la duubay oo ku saabsan Guddiga Dib-u-eegida Caafimaadka Dhimirka oo luqada badan ku qoran adoo wacaya khadka macluumaadka.

Khadadkaka taleefanku waxay furan yihiin 24 saac maalintii, toddobo maalmood isbuucii.

| | |
|---|---|
| Ingiriisiga | 9679 9838 |
| Carabi | 9679 9825 |
| Kaamboodiyan | 9679 9826 |
| Kantonese | 9679 9827 |
| Karoweyshiyan | 9679 9828 |
| Greek | 9679 9829 |
| Talyaani | 9679 9830 |
| Masidooniyan | 9679 9831 |
| Mandarin | 9679 9837 |
| Serbiyan | 9679 9834 |
| Somali | 9679 9832 |
| Isbaanish | 9679 9833 |
| Turkish | 9679 9835 |
| Fiyatnaamese | 9679 9836 |

Waxaa daabacay Qaybta Daawada iyo Caafimaadka Dhimirka ee Dawlada Victoria
Wasaaradda Adeegyada Bani’aadamka, Melbourne, Victoria, Australia.
© Xuquuqda xafidan waxaa iska leh Gobolka Victoria, Wasaaradda Adeegyada Bani’aadamka 2008.
Daabacaadan waxaa laga yaabaa in dib loo saaro qayb ahaan ama iyadoo dhan haddii la xuso cidda xuquuqa xafidan iska leh.
Sibteembar 2008 (080519)
Waxaa ogolaaday Dawlada Gobolka ee Victoria, Melbourne.

**Miyaad ugu baahan tahay buuggan yar qaab kale?**

Haddii aad ugu baahan thaay buuggan yar qaab kale waa inaad la hadashaa maamulaha kiiskaaga ama xubin kasta oo ka mid kooxda daaweynta.

State Government Victoria
Department of Human Services